



MCA iyo MTAS xilliga lagu jiro aafada COVID-19

Ahmiyadda Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) waa in la ilaaliyo caafimaadka iyo ammaanka ardayda iyo shaqaalaha. Degmo iyo iskuul charter kasta waxay soo saareen taxaddarro caafimaad iyo ammaan oo maxalli u ah oo loogu talagalay maamulka imtixaanka, iyada oo lagu salaynayo macluumaadka ay bixiyaan MDE iyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH).

Maxay yihin MCA iyo MTAS?

Qiimaynta Dhamaystiran ee Minnesota (Minnesota Comprehensive Assessment (MCA)) iyo Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Tacliinta (Minnesota Test of Academic Skills (MTAS)) waa akhriska, xisaabta, iyo qiimay ku salaysan heerarka sayniska oo loo adeegsado in lagu buuxiyo shuruudaha sharci dejinta ee federaalka iyo gobolka. Qiimayntan ayaa waxaa lagu cabirayaa gaaritaanka Heerarka Laga Rabo Tacliinta ee Minnesota.

Ardayda badankood waxay qaataan MCA, laakiin ardayda qaata adeegyada waxbarashada ee gaarka ah ee buuxiya shuruudaha u qalmitaanka MTAS ayaa waxay qaadan karaan MTAS oo beddelkiisa ah.

Goorma ayey ardaydu qaadan karaan MCA iyo MTAS sanad dugsiyeedka 2020 - 21?

Akhriska iyo Xisaabta MCA, iyo Akhriska, Xisaabta, iyo Sayniska MTAS, ardaydu waxay qaadan karaan imtixaannada inta u dhaxaysa Maars 8 iyo Maajo 21. Sayniska MCA, ardaydu waxay qaadan karaan imtixaanka inta u dhaxeysa Maars 8 iyo Maajo 21.

Sidee loo bixiyaa MCA iyo MTAS?

MCA iyo MTAS labadaba waa in lagu qaataa iskuulka dhexdiisa, xitaa haddii ardaygaagu ku jiro wax ku barashada masaafada. Iskuulada waxaa looga baahan yahay inay raacaan talaabooyinka caafimaadka iyo ammaanka markasta oo ardaydu ay ku jiraan iskuulka. MDE, iyada oo lala kaashanayo MDH, ayaa waxay sidoo kale bixiisay hagitaan gaar u ah maamulitaanka imtixaanka, oo ay ku jiraan sida loo nadiifiyo qalabka imtixaanka, in la hubiyo kala fogaanshaha bulshada, iyo in la bixiyo gaadiid iyo cunto hadba sidii loogu baahdo.

Ardayda badankood waxay ku qaataan MCA khadka internetka, laakiin qaar ka mid ah ardayda u qalanta ayaa imtixaanka ku qaata buuga imtixaanka warqadda ah oo beddelkeed ah. Waxaa loogu talagalay MTAS, in macallimiintu ay ula shaqeeyaan arday kasta shaqsi ahaan iyagoo adeegsanaya qalabka imtixaanka warqadda ah.

Maxay yihii tallaabooyinka caafimaadka iyo ammaanka ee la raacayo iskuulku?

Iskuulada ku shaqaynaya shaqsi ahaan ama qaabab waxbarasho ee isku dhafan ayaa raacaya hagitaan lagu qeexay [Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah ee Sanad Dugsiyeedka 2020-21](#) ee ay sameeyeen MDE iyo MDH. Qof kasta oo ku jira dhismaha iskuulku waa inuu xirto maro wejiga lagu dabooloo oo uu u hogaansamo dhaqamada kala fogaanshaha bulshada. Iskuulada waxaa laga filayaa inay nadiifiyaan oo jeermiska ka dilaan meelaha dushooda si joogto ah. Qalabka imtixaanka waa la nadiifin doonaa ka hor isticmaal kasta. Iskuuladu sidoo kale waxay xaddidayaan tirada dadka soo booqanaya dhismayaashooda waxayna la socdaan dhammaan ardayda iyo shaqaalaha calaamadaha COVID-19. Qof kasta oo qaba astaamaha COVID-19 looma oggolaan doono gudaha dhismaha iskuulka.

Haddii iskuulku ku shaqaynayo wax ku barashada masaafada, waxay raaci doonaan qorshahan ammaanka inta lagu jiro imtixaanka.

Kawaran haddii aan ka walwalsanahay caafimaadka iyo ammaanka ardaygayga ama qoyskayga oo aanan rabin inay iskuulka u galaan si ay u qaataan imtixaanka?

Iskuulkaaga ayaa ku siin kara macluumaad cayiman oo dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo tallaabooyinka ammaanka ee ay qaadayaan si loo hubiyo in ardayda iyo shaqaaluhu ay nabad iyo caafimaad qabaan inta lagu jiro qaaditaanka imtixaanka.

Haddii ardaygaagu ku jiro wax ku barashada masaafada oo aadan rabin in ardaygaagu u aado iskuulka si uu imtixaanka u qaato sababo la xiriira walaac xagga caafimaadka iyo ammaanka ah oo la xiriira COVID-19, waxaad u dooran kartaa ardaygaaga inuusan qaadanin MCA ama MTAS. Ma jiraan wax cawaaqib ah oo ku imaanaya ardaygaaga ama qoyskaaga haddii aysan ka qaybqaadanin. Haddii aadan rabin in ardaygaagu ka qaybqaato, iskuulkaaga soo ogeysii.

Sideen ku heli karaa macluumaad dheeri ah?

La xiriir iskuulkaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamkooda caafimaadka iyo ammaanka inta lagu jiro imtixaanada gobolka oo dhan, iyo sida dhibcaha imtixaanadan loogu isticmaalo in lagu taageero waxbarashada ardaygaaga.

[Xaashida Xaqiqida ee Waalidka ee MCA iyo MTAS](#) waxaa laga heli karaa websaydka MDE (oo ku jirta qaybta Ardayda iyo Qoysaska > Barnaamijyada iyo Waxqabadyada > Imtixaanka Gobolka oo dhan) oo ku qoran luqado kala duwan. Fadlan email u soo dir mde.testing@state.mn.us haddii aad qabto su'aalo ku saabsan MCA ama MTAS.